



Mashaariicda casriyeynta ee Lincoln, Madison iyo Kellogg si fiican ayey u socdaan

[Mashruuca Dib-u-dhiska Lincoln High School](#) hadda ayuu socdaa waxaana meesha ka muuqdaa isbaddal wayn markiiba. Intii fasaxa ciiddu socday, kooxda Hoffman Pacificmark waxay qotomiyeen dhisidda dayrka waxayna bilaabeen shaqada duminta meesha dadku fariistaan ee garoonka kubbadda cagta iyo qolka saxaafadda. Dooggii garoonka ayaa sidoo kale meesha laga saaray.

Goobta hadda waa la simayaa iyadoo la adeegsanayo cagafyo iyo qalabyo culus. Hoffman Pacificmark waxay isticmaaleen ka badan 13 milyan oo rodol oo shub dib loo warshadeeyey ah oo laga soo qaatay meel deegaanka ah oo mashruuc ka socdaan si loogu buuxiyo seeska. Dadaalkan dib-u-warshadaynta waxa laga helaa alaab xaddigeedu badan yahay oo dhulka lagu buuxiyo wuxuuna marxiyaa lacag meelo kale lagu isticmaali karo. Shaqada seeska ee dugsiya sare ee Lincoln High School ee lixda dabaq ah dhawaan ayuu bilaabmi doonaa.

[Fiiri sawirrada mashruuca Lincoln ee ugu dambeeyey](#)

Dib-u-qaabaynta gudaha iyo u adkaysiga dhulgariirka ayaa ka socda Madison

[Shaqo ayaa ka socota Madison High School](#), iyadoo gudaha dib loo qaabanayo dhulgariirka mid u adkaystana laga dhigayo. Dhismaha jimicsiga ee cusub, jaajuurkii ayaa la isa saarayaa iyadoo qolka culayska, qolka lagdanka, qolalka kabadhada ay si fiican u socdaan heerka jimicsiga ee hoose.

Garabka maamulka iyo fasalka sayniska, islaabka shubka ayaa la shubay oo birtii ayaa la bilaabay in la galiyo. Dhismaha farshaxanka fayn artiska, isa saaridda jaajuurka qaybta muusiga ayaa sii wada inay sare u kacaan iyadoo isla markaana cagaha tiyaatarka sanduuqa madow la wado.

[Daawo fiidyowiyada wakhtigii hore ee shaqadan Madison](#)

[Fiiri sawirrada mashruuca Madison ee hore](#)

Qaabdhismeedka Kellogg cusub ugu dhawaan waa dhammaad

Bir ka dhigista qalfoofka [Dugsiga Kellogg Middle School ee cusub](#) ugu dhawaan waa dhammaad, iyadoo biimkii birta ahaa ee ugu dambeeyey la saari doono dhismayaasha Waxbarashada saddexda dabaq ah ugu dambayn Febraayo. Dhismayaasha jimicsiga iyo farshaxanka masraxa, kuwaasi oo gidaaradooda shubka ah ee janjeedha la kiciyey Noofambar, dhawaan ayaa dibadda laga xiri doonaa, taasi oo oggolaan doonta qolfoofka gidaarka gudaha in la bilaabo. Marka halkaa la joogo, nidaamyada makaaniga, korontada iyo biyo-galinta ayaa bilaabi kara in lagu sameeyo dhismaha.

U qorshaynta qurxinta, fadhiyada, qalabka iyo teknoolojiyadda fasalka ayaa socda si loogu diyaariyo dhismaha shaqaale maamul oo cusub oo degi doona dhismaha gu'ga 2021. Tani waxay u oggolaan doontaa ka bilaabidda barnaamijka dugsiga dhexe ee cusub Kellogg Middle School dhismaha kahor inta ayna ardaydu soo galin dayrta 2021.

[Fiiri sawirrada mashruuca Kellogg ee ugu dambeeyey](#)

Shaqada casriyeynta Lincoln, Madison iyo Kellogg waxa lagu maalgaliyey curaarta cod-bixiyuhu ansixiyey ee 2017 Si aad u aragto sawirradii ugu dambeeyey ee shaqada una hesho wixii ka soo kordhay mashruuca Curaarta booqo [Web-beyjka Barnaamijka Curaarta.](#)